**Interview of and Legal Clarification of The House Of Representatives' Legal Adviser on the Legality of The House Decisions based on its Rules Of Procedure**

**Wareysiga La Taliyaha Shraciga Ee Golaha Wakilldda Iyo Iftiimin Sharci Oo Uu Qoray 2013**

## LA-TALIYAHA SHARCIGA EE GOLAHA WAKIILLADA OO IFTIIMIYEY SHARCINIMADA HABKII LOO DOORTAY GUDDOOMIYAHA CUSUB

*August 11, 2017 | Published by: Somalilandpost website. Posted Here on 23 August 2017*
*http://www.somalilandpost.net/la-taliyaha-sharciga-ee-golaha-wakiillada-oo-iftiimiyey-sharcinimada-habkii-loo-doortay-guddoomiyaha-cusub/*



Hargeysa (SLpost)- La-taliyaha Sharciga ee Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland Garyaqaan Mustafe Maxamed Xaaji Daahir, ayaa soo bandhigay dariiqa sharci ee loo maray doorashadii Guddoomiyaha cusub ee Golaha Wakiillada ee qabsoontay maalintii Axadda, isagoo sidoo kale ka hadlay qaabka loo marayo tabashooyinka ka soo baxa doorashada xubnaha shir-guddoonka Golaha Wakiillada.

Garyaqaan Mustafe Maxamed Xaaji Daahir oo warraysi dhinacyo kala duwan leh siiyey wargeyska ***Jamhuuriya*** shalay, waxa uu iftiimiyey sharcinimada Guddoomiyaha cusub ee Golaha Wakiillada Md. Baashe Maxamed Faarax iyo in Maxkamadda Sare, ahna Maxkamadda Dastuuriga ah ka garniqi karto go'aanada ka soo baxay Golaha Wakiillada.

Waraysigaas oo garyaqaanku kaga jawaabay su'aalo wax lagaga weydiiyey hannaankii loo maamulay tirinta codadkii xildhibaannada Golaha Wakiilladu ku doorteen guddoomiyaha cusub, sharciyadda doodda sheegashada xildhibaan Talyane iyo arrimo kale oo xiise leh waxa uu u dhacay sidan:

***Jamhuuriya: Garyaqaan, sharciyan bal sharrax kooban naga sii qaabkii iyo hannaankii ay u dhacday doorashadii guddoomiyaha cusub ee Golaha Wakiillada oo muranka xooggan dhalisay ma ahayd mid sharci ah?***

**Garyaqaanka:** Walaal; haddaan ka jawaabo su'aashaas Golaha Wakiilladu isagoo raacaya Dastuurka Jamhuuryadda Somaliland, qodobadiisa 45aad iyo 53aad iyo waliba Xeer-hoosaadka qoddobaddiisa kala ah; 6aad iyo 25aad ayuu qabtay fadhi. Kalfadhigan 32aad taariikhdu markay ahayd 06 August 2016, fadhigaas oo loo ballansanaa in lagu doorto Guddoomiyaha Golaha Wakiillada, xilkaas oo sida aad ka warqabtaan uu banneeyey, iskana casilay guddoomiyihii hore ee Golaha Wakiillada Md. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi 02 August 2017, iyadoo xeer-hoosaadku si cad u tilmaamay qodobkiisa 6aad Faq 4aad in "Marka ay bannaanaato jagada guddoomiyaha, waxa

shaqada sii wadaya Guddoomiye-xigeenka 1aad, goluhuna shaqo kale ma qabanayo ilaa uu doorto guddoomiye, taas oo ku dhacaysa 7 maalmood gudahood haddii uu kalfadhigu furan yahay.

Haddaba, iyadoo qobobkaas laga duulayo, waxa fadhiga furay Guddoomiye-ku-xigeenka 1aad Md. Baashe Maxamed Faarax, markii fadhiga la furay Guddoomiye-ku-xigeenku wuxuu soo gudbistay, iclaamiyeyna inuu u sharraxan yahay Guddoomiyaha Golaha, iskana casilay xilka guddoomiye-ku-xigeenka 1aad ee Golaha, sida uu sheegayo xeer-hoosaadka qodobkiisa 10aad oo odhanaya “inuu iska casilo xilka, wareejiyana guddoominta fadhiga.”

Waxa isla markiiba guddoominta fadhiga golaha la wareegay Guddoomiye-ku-xigeenka labaad Md. Cali Yuusuf Axmed, waxaanu isagoo xeer-hoosaadka raacaya qodobka 6aad faq 7 iyo 8aad uu soo bandhigay murrashax kastaa waa inuu soo gudbiyo qoraal muujinaya rabitaankiisa oo ay la socdaan laba sawir iyo taariikh-nololeedkiisa (CV). Murrashax walba waa inuu qoraalkiisu ku soo qeexaa jagada uu u tartamayo; haddii ay tahay guddoomiyaha iyo ku-xigeennada. Waxa qoraalkooda murrashaxnimo soo gudbistay Md. Baashe Maxamed Faarax oo hore u ahaa Guddoomiye-ku-xigeenka 1aad iyo Md. Cabdiraxmaan Maxamed Talyaani oo ah mudane ka tirsan Golaha Wakiillada, waxaannu guddoomiyaha fadhigu mudane Cali Yuusuf Axmed soo bandhigay in jagadaas Guddoomiyaha Golaha ay soo gudbisteen, una sharraxan yihiin Cabdiraxmaan Maxamed Talyanle iyo Baashe Maxamed Faarax.

Intaas kadib Guddoomiyuhu isagoo raacaya xeer-hoosaadka wuxuu amray xoghaynta in codka la sugo tirada xildhibaannada ah ee golaha fadhiya, waxaannu ku dhawaaqay in 78 mudane ay fadhiyaan, xaadirna yihiin, kadibna wuxuu bilaabay codayntii oo uu ku bilaabay cidda u codaynaysa murrashax mudane Cabdiraxmaan Maxamed Talyanle, dabadeedna wuxuu ku xigsiiyey mudane Baashe Maxamed Faarax, kadibna guddoomiyuhu markuu aad u hubsaday tirada codadka ay kala heleen labada murrashax, wuxuu ku dhawaaqay natiijadii, waxaanay u dhacday in mudane Cabdiraxmaan Talyanle uu helay cod dhan 38 cod, halka uu murrashaxa laadna helay 39 cod, waxaannu sheegay guddoomiyaha fadhigu waa guddoomiye-ku-xigeenka 2aad Md. Cali Yuusuf Axmed inuu ku guulaystay jagada Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Md. Baashe Maxamed Faarax. Waxa uu isagoo xeer-hoosaadka raacaya isla fadhigaas ku wareejiyey guddoominta golaha guddoomiyaha cusub ee la doortay, guddoomiyihii cusbaana wuxuu iclaamiyay isagoo raacaya xeer-hoosaadka golaha, qodobkiisa 6aad oo sheegaya in doorashooyinka guddoomiye-ku-xigeennada la waafajiyo hab-raaca doorashada guddoomiyaha oo noqonaysa in mudda toddoba casho ah lagu doorto Guddoomiye-ku-xigeenka 1aad ee Golaha oo ka bilaabmaysa maalintii xilkaa la banneeyay oo ahayd 06 August 2017-ka, markaa hannaanka sharci ee loo maray habkaas sharciga ah ayuu ahaa, waanay caddahay Xeer-hoosaadka Golahana way waafaqsanayd.

***Jamhuuriya: Sharciyan miyaanu murrashaxa la iclaamiyay in laga guulaystay oo ah Xildhibaan Cabdiraxmaan Talyanle xaq u lahayn inuu cabasho ka dhan ah natiijadan keeno?***

**Garyaqaanka:** Wuu u leeyahay, laakiin su'aashu waxa weeyi goorma ayuu caban karaa sharciyan, horta qaabka uu baarlamaanku u doorto madaxdiisu maaha vacuum (meel madhan), balse waxay raacaan Xeer-hoosaadkooda, markaa murrashaxa laga guulaystay haddii uu yahay xildhibaan Cabdiraxmaan Talyanle yahay iyo kuwa ka dambeeyaba yihiinba, wuxuu xaq u lahaa in ka hor inta aannu aqbalin natiijada uu farta taago, isagoo ku dhawaaqaya" Point of Order;" waa eray ay isku fahmaan mudanayaasha iyo Guddoomiyahoodu oo muujinaya in wax khaldan yihiin.

Guddoomiyaha fadhigu wuxuu ku khasban yahay kol haddii uu mudanuhu yidhaa **point of order (hadalka soo dhexgalo)** inuu siiyo hadalka, ka dibna wuxuu ku sheegayaa in aannu natiijadaa ku qanacsanayn, waxaannu dalbanayaa in loogu celiyo. Mar labaad haddii uu ku qanci waayo wuxuu ka dalbanayaa guddoomiyaha inuu keensado cid madaxbannaan oo hawlwadeennada tirinaya codka la tirisa. Waxa muuqata, cadna in murrashaxa laga guulaystay ee Talyanle uu si toos ah u aqbalay natiijada codka ay isaga iyo guddoomiyaha cusub kala heleen, kol haddii uu aqbalayna ma jirto waddo kale oo ka furan waddada keliya ee sharciyan u furnayd, taas ayay ahayd, tiina muu samayn, waannu aqbalay, sidaas ayeyna ku dhan tahay.

***Jamhuuriya: Sida aad la socoto Guddoomiyaha Maxkamadda Sare waxa uu caddeeyey inay Xildhibaan Talyanle iyo xubno la socday ka qabteen arjiga dacwad ka dhan ah tirinta coddayntii xilka Guddoomiyaha golaha, kuwaasoo ku doodaya in uu murrashaxoodu helay Guddoomiyenimada, arrintaas sharciyadeeda nooga warran? Maxkamaddu ma gudo gali kartaa dacwaddaas, maxayse noqon kartaa ififaalaha ka dhan kara?***

**Garyaqaanka:** Walaal, ilaa inta aan hadda ka ogahay in ay dacwaddaas u geeyeen Guddoomiyaha Maxkamadda, habase ahaatee sharciyan aniga laba macno ayey noo leedahay; dacwaddaas arjideedii waa laga qabtay iyo waa la darsayaa. Waxaan kuu sheegayaa ugu horreyn in Maxkamadda Dastuuriga iyo Maxkamadda Sare-ba aanay awood dastuuriya u lahayn ka-garnaqa ama farogelinta go'aan gole, waayo fadhigii maalintii dhawayd golahu ku doortay guddoomiyaha cusub wuxuu ahaa GO'AAN GOLE OO ANSAXAY (RESOLUTION), Goluhuna sida dastuurku caddeeyey wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro go'aamo kana maaha kii ugu horeeyay go'aamo fara badan oo goluhu ansixiyey ayaa yaal kaydka marka laga reebo, mar kaliya wali may dhicin in go'aan gole Maxkamaddu farogaliso, markaasi oo ahayd 22/12/2013-ka, taas oo uu guddoomiyihii hore ee Maxkamadda Sare soo saaray HAKIN go'aan, tirsigiisuna ahaa **MS/GMS/G-7/281/2013,** waxaanay jawaabtii golaha oo aan aniga oo La-taliyaha Sharciga ah u jawaabay qoraal sharci oo goluhu ku garnaqsanayo, una bixiyay IFTIIMIN SHARCI nuxurka gunaanadkiisu ahaa "Xilka shaqo ee xeer-dejintu (Golaha Wakiillada

iyo Guurtida) wxuuu leeyahay xasaannadda gudashada waajibaadkiisa, gudashada xilkaas qaranna waa mid aanay farogalin karin Waaxda Garsoorka.

***Jamhuuriya: Gabagabadii waxa muuqata in meel adag la kala taagan yahay oo xiitaa guddoomiye Baashe iyo mid ka mid ah xildhibaanadii u coddeeyay xildhibaan Talyanle ay gacan iskula tageen, lana xidhay xildhibaankii, markaa sidee ayaad is leedahay xalku wuu ku iman karaa, waa maxayse taladaadu?***

**Garyaqaanka:** Horta xilkaygu sida uu dastuurku iyo xeer-hoosaadkuba xuseen waa xilka la-taliyaha sharciga'e wuxuu ku kooban yahay arrimaha sharciga oo kaliya oo aan golaha kala taliyo, shaqadaydana kuma jirto in aan wax ka idhaa arrimaha ama doodaha siyaasiga ah, xildhibaannaduna waa siyaasiyiin. Waxaan farayaa xildhibaannada oo siyaasiyiin ah, kana soo kala jeedo axsaab kala duwan, kuna wada nool meel kaliye haddii aan sharciga loo soo noqon, go'aamada, milgaha iyo maamuuska goluhu huwan yahayna la ixtiraamin waxa ka dhalan doonta cawaaqib xumo aan laga soo waaqsan karin. Markaa waxaan leeyahay labada dhinacba xil baa idinka saaran inaad ilaalisaan milgaha iyo maamuuska Golaha Wakiillada oo ummadda taariikh weyn ugu fadhiya iyo karaamada ummaddan muddada 25 sannadood ka dhursugaysan in mar uun ay hesho ictiraaf caalimi ah, kana mid noqoto dawladaha caalamka si ay dunida si fudud ugu safri karto, ulana ganacsan karto.

---

**LIFAAQ: IFTIIMIN SHARCI 2013**

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**
**GOLAHA WAKIILADA**
**XAFIISKA LA-TALIYAHA SHARCIGA**

---

**Date: 26/12/2013**

# IFTIIMIN SHARCI: GO'AANKII MAXKAMADA DASTUURIGA IYO QORAALKII MAXKAMADA SARE

**"Xilka shaqo ee xeerdejintu wuxuu leeyahay xasaanadda guddashada waajibkiisa. Gudashada xilkaas qarana waa mid aanay faro gelin karin Waaxda Garsoorku"**

## I. HORDHAC

Guddoomiyaha Golaha Wakiiladu isagoo gudanaaya waajibaadka Dastuuriga ee ku cad Qodobka 53aad ee Dastuurka iyo Qodobka 14aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Wakiilada oo tilmaamaya Xilka Gudoomiyaha Golaha ee Fulinta iyo ku-dhaqanka Xeer-hoosaadka, ilaalinta nidaamka Golaha iyo habsami u socodka hawlaha Golaha oo dhan" isagoo Qodobkaa ka duulaya wuxuu ii soo gudbiyay Go'aan iyo Qoraal ka yimid Maxkamada Sare iyo Maxkamada Dastuuriga JSL ee Hoos Ku Xusan si aan uga soo bixiyo TALO SHARCI ugana guto xilka iyo masuuliyada La Taliyaha Sharciga Golaha ee uu tilmaamay Qodobka 52aad ee Dastuurku.

## II. TILMAAMID IYO IFTIIMIN SHARCI

Sida uu dhigayo **Qodobka 37aad** ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland oo tilmaan cad ka bixiyay Qaab-dhismeedka Qaranka oo ku dhisan Kala Madaxbanaanida Waaxaha Qaranka (Separation of Powers) waxaanu u dhigan yahay sidan:

> Dhismaha Qaranku wuxuu ka kooban yahay saddex waaxood oo kala ah: Xeerdejinta, Fulinta iyo Garsoorka. Kala xadaynta awoodaha saddexda waaxood waxay noqon doonaan sida uu Dastuurku dhigayo. **WAAX waliba awoodda Dastuurku u gaar yeelay way u madax bannaan tahay.**

Hadaynu si cad u iftiiminimo Dastuurka Qodobkiisan **37$^{aad}$** Waaxaha Qaranku waa Sadex (Xeer-dejinta, Garsoorka iyo Fulinta) waxaanay leeyihiin awoodo siman oo kala madaxbanaan kuna salaysan Dastuurka Jsl.

Golaha Wakiiladu isagoo gudanaya waajibaadkiisa, ixtiraamayana Saldhiga iyo Saraynta Dastuurka ee uu xusay Qodobka 128$^{aad}$ Islamarkaana ilaalinaya Haybadda iyo Awoodaha Waaxda Garsoorka ee uu Dastuurku u gaar yeelay Qodobadiisa 97aad, 98aad, 99aad, 100aad,

101aad iyo 102aad wuxuu Golaha Wakiiladu u iftiiminayaa Waaxda Garsoorka iyo Ummadda uu wakiilka ka yahayba arimahan Sharci ee soo socda:

1. In Qoraalkii rasmiga ahaa ee ka soo baxay **Maxkamada Sare ee** uu ku saxeexnaa Guddoomiyaha Maxkamada Sare Yuusuf Ismaaciil Cali tixraaceeduna ahaa MS/GMS/G-7/282/2013 ee ku taariikhaysnayd 21/12/2013ka nuqul ka mid ahna uu soo gaadhay 22/12/2013ka Aqalka Golaha Wakiilada ujeedadeeduna ahayd Gudbin Nuqul Dacwad iyo Keenid Jawaab Celin isla markaana ka hadlayay Dacwad ka dhan ah Go'aankii isku Shaandhaynta Gudiyada Golaha Wakiilada ee ay u soo gudbiyeen Labada Gudoomiye ku Xigeen ee Golaha Wakiilada Mudane Baashe Mohamed Farah Guddoomiye ku xigeenka 1aad iyo Dr Ali Yusuf Ahmed Guddoomiye ku xigeenka 2aad. Sida kor ku xusan, Qoraalkaasi oo tixraaciisa ahaa MS/GMS/G-7/282/2013 wuxuu Si Cad U Baalmarsan Yahay Qodobka 49aad Ee Dastuurka oo tilmaamaya Dhawrsanaanta Xubinta Golaha Wakiilada una dhigan sidan:-

   **"**Ma bannaana in laga qaado xubinta Golaha Wakiilada tallaabo baadhitaan ama waraysi ama qabasho ama xidhitaan ama tallaabo kale oo ciqaab la xidhiidha iyada oo oggolaansho looga helo Golaha Wakiilada mooyaane.**"**

⇒ Isla Qodobka 22aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Wakiiladu wuxuu ku nuuxnuuxsanayaa Xilka Guddida Joogtada Ah faqradiisa 5aad waxay leedayahay **"Guddida Joogtadu waxay u xilsaaran yihiin wixii ka yimaada isqabad Iyo tarjumada Xeer-hoosaadka iyaga oo la tashanaya La-taliyaha sharciga ee Golaha"**. Isla Qodobkan **22aad** ee Xeerhoosaadka Faqradiisa Sadexaad waxay waajib ka dhigaysaa tilmaamaysaana isagoo u dhigan sidan **"Guddiga Joogtadu wuxuu awood u leeyahay muddada jiritaanka Golaha in uu soo jeediyo wax ka beddelka ama wax ku kor-dhinta xeer-hoosaadka Golaha iyo fasiraadda qodobbada Xeer-hoosaadka"**

Qoraalkani wuxuu u Iftiiminayaa MAXKAMADA SARE ee soo saartay warqada nuxurkeedu ahaa Gudbin Nuqul Dacwad iyo Jawaab Celin oo Guddoomiyaha Golaha Wakiilada lagu farayo Jawaab Celin Dacwad wuxuu si cad u khilaafayaa Awooda Maxkamada Sare ee ay u xilsaaran tahay waxaanay ku xusan yahay Waaxda Garsoorka Qodobkiisa 97aad faqradiisa 2[aad] ee Dastuurka oo odhanaysa:-

> Waaxda Garsoorku waxay hawlaheeda u fulinaysaa si Dastuurka Waafaqsan, iyada oo ka madax-bannaan waaxyaha kale ee Qaranka"

Isla Qodobka **10aad** Faqradiisa 3[aad] ee Xeerka Nidaamka Garsoorku (Lr 24/2003) wuxuu maxkamada u Qeexayaa islamarkaana u Xadaynayaa Awoodeeda isagoo u dhigan **"**Maxkamada Sare Waxa ay awood u leedahay:-

**a)** Go'aan ka gaadhida cabashooyinka laga keeno doorashooyinka

b) Go'aan ka gaadhida khilaafyada dhexmara qaybaha garsoorka ee ku saabsan awooda dhagaysiga dacwadaha
c) Go'aan ka gaadhida dacwadaha laga keeno goaamada dhamaadka ee maamulka dawlada
d) Dhagaysiga iyo Go'aan ka gaadhida cabashooyinka laga keeno maxkamadaha gobolada eek u saabsan kuraasida golayaasha deegaanka
e) In ay dib u eegto xukamadeeda marka la helo shuruudaha ku xusan Qodobka 266 ee Xeerka Habka Madaniga ah iyo Qodobka 238 ee Habka Ciqaabta
f) Maxkamada Sare Goaankeeda ku saabsan cabashada iyo dacwadaha laga keeno doorashada Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka, Doorashada Baarlamaanka iyo Golayaasha Deegaamada".

**Hadaad Faqradaha Qodobkan dib u jaleecdo meelna kagama taal <u>Ka-Garnaqista Hawlaha Shaqo Ee Xeerdejinta</u>.**

Qodobka **79aad** ee Dastuurku Faq.1aad ayaa meesha ka saaraya si cadna u qeexaysa inaan Xubnaha Golahaasha (Wakiilada iyo Guurtida) hadaan dambi ciqaabeed wayn oo ciqaabtiisu 3 Sannadood gaadho aanay faraha kula jirin (flagrante de licto) lama hor geyn karo maxkamad, loomana gudbin karo xabsi, ilaa xubinta ama xubnaha laga xayuubiyo dhawr-sanaanta xilka ay ummadda u hayaan.

**<u>ANIGOO KA DUULAYA QODOBADA AAN SARE KU XUSAY</u> ee 49aad, 79aad iyo 97aad ee Dastuurka iyo Qodobka 10aad Faq. 3aad ee** Xeerka Nidaamka Garsoorka (Lr 24/2003) **iyo waliba Qodobka 22aad Faqradihiisa 3aad iyo 5aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Wakiilada Warqadda ka timid Maxkamada Sare ee Sumadeedu tahay** <u>MS/GMS/G-</u>7/282/2013 ee ka soo baxday Maxkamada Sare taariikhdu markay ahayd 21/12/2013ka WAXAY BAALMARSAN TAHAY AWOODA MAXKAMADA (Jurisdiction of the Court) oo aanay Meelna kaga xusnayn Fara Galinta iyo Ka Garnaqista Hawlaha Shaqo ee Golaha Wakiilada u Gaarka ah waxaanay warqadaasi ku sifowday waxba kama jiraan (null an void) maadaama ay khilaafsan tahay Dastuurka, Xeerka Nidaamka Garsoorka (24/2003) iyo Xeerhoosaadka Golaha Wakiilada mana laha Dhaqan Gelin Sharci.

**2.** Go'aankan ay soo saartay **<u>Maxkamada Dastuuriga ah</u>** ee tixraaciisu yahay **MS/GMS/G-7/281/2013** ee ku taariikhaysan **21/12/2013ku** uu kuna saxeexnaa Guddoomiyaha Maxkamada Sare Yuusuf Ismaacil Cali iyo 4 Xubnood Garsoorayaal Maxkamada Sare ka tirsan wuxuu KHILAAFSAN YAHAY Qodobka 38aad ee Dastuurka oo odhanaya **"**Awoodda Xeer-dejinta ee Jamhuuriyadda Somaliland waxay gaar ku tahay Baarlamaanka oo ka kooban laba Gole oo kala ah Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtida. Xilka xeer-dejintu uma wareegi karo cid ka baxsan Baarlamaanka.**"**

⇒ Go'aankan ay soo saartay Maxkamada Dastuuriga ah ee tixraaciisu yahay **MS/GMS/G-7/281/2013 wuxuu si cad u baalmaray SHARCINIMADA XEER-HOOSAADKA Golaha** ulana dhaqmay Xeer Aan Jirin. Xeerhoosaadku wuxuu ka soo dheegmay **Qodobka**

**46** **aad** Faqradiisa 3aad ee dastuurka oo si cad u jidaynaysay Xeer-Hoosaadka Golaha Wakiilada una dhigan sidan:

"Kalfadhiga ugu horeeya waxa golaha wakiiladu ku ansixinayaa Xeer-hoosaadkiisa waxaanu ku dhisanayaa Gudi Hoosaadyo inta uu u baahdo" wuxuu muran ah ee ka soo dhex baxa golaha waxa lagu maamulayaa xeerhoosaadkiisa.

⇒ Adeegsiga **Qodobka 15aad** ee Xeerka Nidaamka Garsoorku (Lr 34/2003) u adeegsatay Maxkamada Dastuuriga ahi Go'aankan tixraaciisu yahay **MS/GMS/G-7/281/2013** wuxuu ahaa mid khaldan waxaanu **Qoraalkani U Iftiiminayaa Maxkamada Qodobkan** **15aad** isagoo si cad ugu xardhan faqrada 10aad ee Xeerka Nidaamka Garsoorka una qoran sidan:

"Maxkamada Dastuuriga ah waxa ay si ku meel gaadh ah u laalaysaa ku dhaqanka xeerka ama qodobka DASTUURNIMADIISA la duray"

Hadaba, Qodabkan 15aad Faq. 10aad ee ay u adeegsadeen Maxkamada Dastuurigu Go'aankan Hakinta Go'aanka Isku Shaandhaynta Gudiyada Golaha waa **Si khaldan u Adeegsi** maxaa yeelay arintan uu goaanku ka hadlayaa (Factual Matter) maaha hawsha loo adeegsanayo. Waayo, arinta uu ka hadlayaa waa Qodobada Dastuurka ama Xeerarka kale (Statute) ee dhaliya ama la fahmi waayo macnihiisa ama Dastuurnimadiisa la duro isla markaana keena muran sharci ayay maxkamadu awood u leedahay inay Fasirto iyadoo raacaysa nuxurka doodii ka dhalatay xeerkan ama qodobkan Dastuurka markii ay Xeer Dajintu samaynaysay ka dibna awoodoodu waa inay fasiraan (cadeeyaan) macnaha sharci.

Dacwada ay Guddoomiye Ku Xigeenka Koowaad Mudane Baashe Mohamed Farah iyo Dr Ali Yusuf Ahmed u gudbiyeen 19/12/2013 Maxkamada Dastuuriga sida ka muuqata nuqulka lifaaqa uu Guddoomiyaha Maxkamada Sare u soo gudbiyay Golaha Wakiilada in ay ku salaysnayd oo kaliya Go'aankii isku shaandhaynta guddiyada ee Tixraaciisu ahaa **GW/G/04/152/2013 kuna taariikhaynaa 06/11/2013. Goaankaas isku shaandhaynta guddiyadu wuxuu si rasmi ah uga soo baxay 06/11/2013ka Shirgudoonka Golaha Wakiilada** oo ay si Talo Wadaag Ah u soo wada saareen Shirgudoonku uu kuna saxeexnaa Guddoomiyuhu goobjoogna ay ahaayeen wakhtigaas (Guddoomiyaha Golaha Wakiilada Mud. C/rahman Mohamed (Ciro) iyo Gudoomiye Ku Xigeenka Labaad Dr Ali Yusuf Ahmed) Go'aankaas wuxuu ku qotomay **Qodobka 18aad** Faqradiisa 1aad, Faq. 2aad iyo Faq. 4aad Qodobka 21aad & 22aad ee Xeer-hoosaadka Golaha iyo Goaankii Golaha ee Fadhigii Xidhnaa ee Mudada Sadexda Cisho,

Goaankii Isku Shaandhaynta Gudiyada Golaha ee **06/011/2013** waxaa Ansaxnimadiisa iyo Sharcinimadiisa ku wehehelinayay qodobadan aan sare ku xusay **Goaankii Aqlabiyada (eeg lifaaqa) Mudanayaasha Golaha ee 21/12/2013 Tixraaciisuna ahaa GW/G/KF-23/622/2013** oo ay COD AQLABIYADD AH (47 Mudane) Cod Gacan taag ah ku ansixiyeen Goaankii isku Shaandhaynta iyo Guddida Joogtada ah ee Golaha Wakiilada oo uu xeerhoosaadka qodobkiisa 22aad sheegayo" Guddida Joogtada ah waxa soo magacaabaya Shir-Gudoonka Goluhuna wuxuu

ku ansixinay cod hal dheeri ah (Aqlabiyada Fudud)" iyo waliba wareegtadii ku taariikhaysnayd 21/12/2013 ee tixraaceedu ahaa **GW/G/04/215/2013** ee uu Gudoomiyuhu ku dhaqan galiyay is doorashada Gudoomiyeyaasha Guddi Hoosaadyada Golaha Wakiilada (Ka Eeg Lifaaqa)

**ANIGOO KA DUULAYA QODABADA SARE KU XUSAN**, Go'aankan ay soo saartay Maxkamada Dastuuriga ah ee tixraaciisu ahaa **MS/GMS/G-7/281/2013** ee ku taariikhaysnaa **21/12/2013ku** ee uu nuxurkiisu ahaa Hakin Ku Dhaqan Go'aan Lam **GW/G/04/152/2013 WUXUU SI CAD U JABIYAY UNA BAALMARAY QODOBKA 37aad ee Dastuurka oo ka hadlaya Dhismaha Waaxaha Qaranka, Qodobka 53aad ee Dastuurka Awooda iyo Waajibaadka Golaha Wakiilada iyo Xeer-hoosaadka Qodobadiisa 3aad, 14aad, 18aad, 21aad, 22aad** Iyo Aqlabiyadii Kalsoonida Goaankii Goleweynaha ee **21/12/2013** Tixraaciisuna ahaa **GW/G/KF-23/622/2013 ee ku taariikhaysnay 22/12/2013** ee ay Mudanayaashu ku meelmariyeen Sharcinimada (Legitimate) iyo Ansaxnimada (Validity) Go'aankii Isku Shaandhaynta Guddiyada Golaha

MA JIRTO CID AMA HAYADD BURIN KARTA GO'AAN GOLE WAXA KALIYA OO TIRTIRI KARA AMA BURIN KARA GO'AAN KALE OO GOLUHU UGU CODEEYO AQLABIYAD BURINAYSA GOAANKAAS HORE MOOYAANE.

## III. GABA-GABO

Ugub maaha in arrimo Golaha Wakiilada ama Golaha Guurtida dhexdooda ah laysku qabto waxa lagu xalin jiray nidaamka shaqada ee Barlamaanada (Parliamentary Procedure and Practice).

Markaa Haddii ay jirto Cabasho iyadoo la ixtiraamayo Awoodaha iyo Karaamada Xeerdejinta waa in loo maraa Habka Xil-Gudasha iyo Xalinta Khilaafka ee Xeer Dejinta (World Parliamentary Procedure and Practice).

Allaa Mahad Leh,

**Garyaqaan Mustafe Mohamed H.Dahir**
**La-taliyaha Sharciga ee Golaha Wakiilada Jsl**